Llywodraeth Cynulliad Cymru
Welsh Assembly Government

Welsh Assembly Government's Single Equality Scheme

Executive Summary
2009 - 2012



MASHRUUCA DAWLAD GOBOLEEDKA WELSH KA EE SINAANTA AAN KALA REEBKA LAHAYN IYO QORSHAHII FULINEED 2009-2012

1 KHULAASADII FULINTA

Mashruucan oo ah kii ugu horeeyey dawlad goboleedka welshka ee sinaanta aan kala reebka lahayn iyo qorshihii lagu meel marinayay .

Hore marinta qorshahayaga sinaanta aan kala reebka lahayn waa hab naga caawinaya kaga dhabaynta balan qaadkayagii ku wajahnaa Aragtida “Midnimada Wales" ee dhaqaale xoogan horena u marsan,daryeel caafimaad o sidan ka wanaagsan,heer nolo'leed tayo sare leh iyo mujtamacyada Wiles oo si joogto ah ugu hana qaada kala duwanaan hadana is la wada jaan qaada. Taasi waxay gacan naga siinaysaa fulinta balanqaadkayaga ku aadan mujtamac xaq iyo cadaalad soor ah.

Documantigan hore marintiisa iyo tayayntiisu waxay soo martay sadex marxaladood ama waji oo xidhiidhsan iyo hawlo talo uruurin taas oo ka koobnayd: talo bixintii ugu horaysay ee arimaha sinaanta, (November 2007 – January 2008); ka tashigii qaab dhismeedka shaqada iyo mudnaanta ee mashruuca SES= Sinaanta aan kala reebka lahayn (March 2008 - June 2008) iyo katashigii qorshaha qabyada ah iyo qorshe fulineed keedii (October 2008 – January 2009).

Aa'raadii iyo faalooyinkii nasoo gaadhay wakhtiyadii hawlahaasi socdeen wax tar wayn ayay ku soo kordhiyeen hore u marinta mashruuca SES iyo waaxda qorshayaasha fulineed.

Qorshihii fulinta waxaa ka soo baxay wax lagu dhiiran karo taasi oo waaxdayadu doonayso inayba dhaqan galiso kuna shaqayso sadexda sano ee soo socda si ay u gaadho hiigsigayagii kor u qaadida sinaanta. .

Qaybo ka mid ah nashaadyada ka muuqda qorshayaasha fulintu waa balan qaadyo la gaadhay ama laga soo qaatay khidado iyo barnaamij hawleedyo hore. Qaar kale waxay ku yimaadeen ama waa natiijo ka soo baxday ahmiyad siinta arrimaha sinaanta iyo jawaab-celintii talo uruuriska.

In lixdii biloodba mar dib loo eego ayaa lagu sidkay meel marinta mashruucan si loo hubiyo did u eegid iyo sixidba iaydoo xisaabtana ay ku jirto isbedelada ku imaan kara shuruucda iyo qawaaniinta.

Dawlad goboleedka welshka waxaa ka go'an in dadku u helaan adeegyada si ku haboon muwaadiniinta, qaabilaysana baahiyahooda. Waxaa naga balan ah inaan u shaqayno si nidaamsan waaxaha oo dhan iyo qaybaha ilaa xuduudaha anagoo xooga saarayna tayo u samaynta adeegyada iyo iyadoo uu helo qofka loo adeegayaa adeeg hufan.

Mashruucani wuxuu naga caawinayaa ina aan si cad u muujino sida aan waajibaadkayaga u gudano anagoo wali kushaqayna qaanuunka wakhtigan ee sinaanta. waxay cadaynaysaa sida aan u hore marindoono sinaanta loo wada siman yahay fursadaha dhamaan iyo sida aan u aqoonsanahay una qiimayno kala duwanaanta. Waxaanu doonaynaa in aan hore u sii qaadno in ka badan inta qaanuunka iyo waajibkayagu na faraayo si aan kor ugu sii qaadno u sinaanta fursadaha iyo suulinta kala soocida sharci darada ah ee la xidhiidha laxaad darada,nooca qofka iyo ciriqa ama asal sooca. Taas ayaanu ku soo rogaynaa qaybaha kale ee cusub ee sinaanta sida: da'da,diinta,qofka diin aaminsan iyo ka aan aaminsanayn,xoriyada ikhtiyaarka jinsiga iyo bedelida nooca jinsiga ama jaadka qofka

Baahida dadka ku hadla afka Welsh ku sidoo kale aad bay muhum noogu tahay arintaasina wixii la xidhiidha waxaa qaabilsan hay'ada mashruuca luuqada Welsh ka(Welsh Language Scheme).

Soo saarida mashruucan SES, DG Welsh Assembly Governmentu waxay qiraysaa iyadoo ay jiraan waxyaabo ay isaga midyihiin xaaladaha sinaantu hadana waxaa jira waxyaabo iyo meelo ay ku kala duwan yihiin, waxyaabo u gaar ah mid wal oo ka tirsan sadexda waajib. Taas oo ka dhigaysa waajib walba mid gaar ah oo la xidhiidha xaalad gaar ah oo ka mid ah sinaanta.

Waxaanu u shaqaynaynaa si aanu guul uga gaadhno hawlaha la xidhiidha ixtiraamka ciriqa, laxaad la'aanta iyo jaadka qofka.waxaanu u baahanahay inaan si wacan ula shaqayno shurakadayada oo dhan taas oo hore u riixi karta libin na gaadhsiin karta qorshahan.

Asaaska aanu ku dhisayno ama dhagaxaanta aanu u adeegsanayno dhisida hawlahayagan ku aadan sinaanta,kala duwanaanshaha cadaalada mujtamaca dhexdiisa iyo xuquuqal insaanku waxa weeyaan:

- Daliilyo biyo kama dhibcaan ah oo ku saabsan kala duwanaanshaha umadda degan Wales iyo xaaladaha sinaan la'aanta ay taabteen qaybo iyo ashkhaas kala duwani.

- Suura galinta sinaanta iyo kala duwanaanta oo qayb asaasi ah ka noqota siyaasadayada iyo istiraatiijiyadayada kobcineed(Qiyaasta saamaynta iyo xaalada sinaanta).

- . Waxaanu la kaashanaynaa oo la shaqaynaynaa shurakadayada iyo saami layda si aan shaqadayadan u hore marino.

- Hubinta in muwaadiniinta Wiles ay cod ku yeeshaan kobcinta siyaasadan iyi fulinteedaba.

- . Ku fikirka mashaariicda na soo hor marta iyo fursad wal oo wada shaqayn wada jir ah

- Indho ku haynta shaqadayada si aan u hubino inay si hufan u qaabilayso baahiyaha dadkaanu u adeegayno.

2 Awlawiyaadkayaga ama hawlaha mudnaanta hore leh

Jawaab calintii iyo aaraadii ka soo baxday la tashigayagii waxay naga caawisay go'aaminta hawlaha ugu mudan iyo qaabka ay noqonayso hore u marintu

Dib u eegid waxay waax waliba qabatay ama qabanayso iyo hawlaha mudnaanta hore ugu jira sida lagu go'aamiyey qorshaha khulaasada fulineed ayaa hoos ku xusaan.tafaasiil intaa ka badan ayaa ku xusan qorshayaasha fulinta ee qaybta ka ah mashruuca..

Inay wax is bedalaan mudada uu mashruucu socdo waa wax dhici kara.

2.1 Waaxda hawlaha distoorka ,sinaanta iyo xidhiidhka

Waaxdani waxay garab siisaa wasaardaha Welsh ka oo ay ka caawiso siday adeegyadooda u gaadhsiin lahaayeen iyo xidhiidhinta siyaasadahooda iyo barnaamijyadooda, sidoo kale ogaysiinta shaqaalahawixii arimahaa la xidhiidha Dawlad goboleeda Welshka dhexdeeda.

Sidoo kale waaxdani waxay ka caawisaa dawlad goboleeda Welsh ka hubinta in mabda'ayaga sinaanta iyo kala duwanaanta si fiican loo fahmay loona fuliyey. waxy kale oo ka shaqaysaa hubisaana mabda'a usinaanta fursadaha dadka oo dhami inuu si sax ah uga dhex shaqeeyo siyaasadaha iyo barnaamijyada dawlad goboleedka Welsh ka.

2.1.1 Awlawiyaadka fulinta iyo hawlaha u mudan:

- Siyaasadayadu waxay xisaabta ku darsanaysaa kala duwanaanta umadda Walis, hadafkayaguna yahay in habka xidhiidhku noqdo mid qaabilaya baahiyaha dadyowga kala duwan.

- Codsiyada shaqo,magacaabista jagooyinka iyo balanta dadwaynuhu waa inay muujisaa si lagu faani karona uga muuqdaan dadyowga ay ka kooban tahay nolosha Welsh ku

2.2 Waaxda caruurta,waxbarashada,wax barashada socota iyo mahaardaha

Waaxdan hadafkeedu waa kor u qaadida adeegyada caruurta iyo da'da yar waxay bixisaa wax barasho iyo toobabar si ay u caawiso dadka Wiles inay gaadhaan himiladooda cilmiyeed,mujtamc ahaaneed iyo mustaqbalkooda dhaqaale.waaxdani waxay ku da'daashaa inay soo bandhigto wixii u faa'ida ah caruurta,ardayda,mushtamaca iyo baayac mushtariga iyo sharikadaha ba.

2.2.1 :Awlawiyaadka fulinta iyo hawlaha ugu mudan:

- Kor u qaadida daryeelka caruurta iyo da'da yar oo dhan taas oo loo marayo garb siintooda si ay u gaadhaan halka ugu saraysa himiladooda;hubinta inay ka wada faaidaystaan tacliinta rasmiga ah,ta gaarka ah, iyo ilaalinta xuquuqdooda.

- Xoojinta heerka tacliinta iyo tayaynteeda oo loo maraayo: mahaaradao ku salaysan manaahiijta iyo qorshayaal la xidhiidha qiimaynta. dib u habaynta shahaadoonyinka iyo hore u marinta habka aqoonsiga da'aha oo dhan, kor u qaadida tayada iskuulada iyo xirfad-nimada camaliga ah.

- Hogaaminta doorka uu heerka 16 ee tacliinta iyo nidaamka toobabarku sameeyaan kuna suurta-galiyeen in ardaydoo dhan oo ay ku jiraan kuwa aan lahayn cid matasha iyo qaybaha aan fursada lahayn,si loo gaadho shaqaalaha welsh ka oo yeesha cilmi iyo xirfadnimo sareeya, helana fursado shaqo taas oo lagu gaadhayo cadynta iyo soo bandhiga aqoonta iyo mahaaradaha ay u baahan yihiin meelaha loo shaqo tago,ardayda mushtamaca iyo dawlad G Welsh kuba iyadoo laga dhigayo wax-barashada iyo macaahidka toobabarka qaar dabacsani leh,tayo leh iyo mid ka ka waabaysa baahida wadan iyo mid gobolba.

- Dar dar galinta kobcinta iyo hoos u dhigida faaido yarida iyo wax ka qabashada liidashada fursadaha tacliimeed iyadoo la adeegsanaayo hore marinta siyaasdaha iyo wax qabadka oo lagu bays garaynaayo baahiyaha ardayda da'da walba leh kuna jiraan kuwa baahiyaha gaarka ah lihi iyo inay helaan dhaqaale ardayda iyo wax-bartayaasha kale iyadoon la kaashanayno shurakadayada iyo saami-layaasha waaayn.

Waaxdani waxa ka garab shaqeeya madaxa hay'ada Boqorada ee kormeerka iyo baadhista wax-barashada iyo toobabarka Wales (styn) si ay heer sareeya ugu hogaamiyaan dhamaan ardayda Wales. hay'adani waxay samaysaa kormeer iyo baadhitaan ay u madax banaantahay iyo soo jeedinta talooyin ku qotoma duruufaha iyo baahiyaha u gaar ka ah Wales.

Hay'adani waxay hubisaa oo kale in laamaha dawlada dhexdeeda si quman looga fuliyo mabda'a u sinaanta fursadaha dhamaan iyadoon la tix galinaynin jaadka qofka,midabkiisa.asalkiisa, ciriqa,jinsiyadiisa ,luuqadiisa,qudradihiisa,da'diisa,diintiisa,ikhtiyaarkiisa jinsi.

Qayb ka mid ah baadhitaanka guud ee hay'adani Estyn waxay u kuur gashaa in nidaamka waxbarasho iyo tobabar ee wales lagu ixtiraamo kala duwanaanta,sidoo kale inuu fuliyo kana hor imanaynin mabaadiida la xidhiidha sinaanta,helitaanka iyo fursadaha loo wada siman yahay iyadoon la tix galinaynin jaadka qofka,midabkiisa.asalkiisa, ciriqa,jinsiyadiisa, qudradihiisa,da'diisa,diintiisa,ikhtiyaarkiisa jinsi.

2.3 Waaxda dhaqaalaha iyo gaadiidka

Aragtida iyo falsafada waaxdani waa Wales inay samaysato dhaqaale Wiles ah oo firfircoon, kaasoo sameeya kobcid xoogan socotana cid walibana fursad ka hesho. qaybaha ay waaxdani ka shaqayso wxaa ka mid ah kor u qaadida xaalada sinaacada iyo maal gashiga .nidaam gaadiidka guud iyo xafiiska European ka ee Wales maal galiya.

2.3.1 Awlawiyaadka fulineed

- In aan ugu adeegno baayac mushtarka si hufan oo dhab ah oo la heli karo gaadhsiisan dhamaan daafaha Wales lagan duulaayo baahiyaha qaybaha mujtama oo dhan si siman

- Dar dar galinta isdhaxgalka mujtamaca ,dhaqaalaha iyo fikirka bii'ada.

- Abuurida nidaam gaadiid waxtar la taaban karo leh lana wada heli karo waxna ka taraaya oo moosi kara qaar ka mid ah sababaha sinaan la'aanta.

2.4 Waaxda bii'ada,deganaanshaha iyo guryaynta

Waaxdan hadafkeedu waa u abuurida bii'ad dabiici ah oo is cusboonaysiisa umada Wales iyo jiilalka barito .waaxdu waxay dhiiri galisaa kobcinta socota ee ku taagan istiraatiijiyad bii'adeed. nidaam qorshaysan iyo maamul daaim ah dhulalka cagaaran .talaabooyin bay hore u qaadeen si hoos loogu dhigo qaybta Wales ee isbedelka cimilada sidoo kale waxay ka shaqaynayaan hoos u dhigida raadadka xun ee isbedelka cimilada sida dhisida gaashaamo caliya fatah biyaha roobabka iyo webiyada

2.4.1 Qorshaha fulinta waxaa ugu mudan

- Suura galinta helida guryo munaasib ah , lana hubinayo intii guri walba ku nool mujtamacyada oo dhan inay noqoto tiro ku haboon guriga iyadoon wax tix galin ah aan la siinaynin awooda jeebab kooda .

- Takhdiidka dhulka la isticmaalayo oo ka turjumaya baahida dhabta ah ee loo qabo.

- Kor u qaadida muuqaalka deegaan iyo bii'ad ahaanba.

- In la heli karo bii'ad dabiici ah.

Waaxda waxaa la shaqeeya Golaha deegaanada miyiga ee Wales qorshayaasha fulin tooduna way isa soo galaan.

Golaha deegaanada miyiga ee Wales wuxuu kala taliyaa dawlad goboleedka Welsh ka nolosha baadiyaha iyo duur joogta IWM. Goluhu wuxuu waajibaad kiisa ku gutaa qaab hawleed leh himilo iyo hiigsi uu dajiyo wasiirka bii'ada iyo guryayntu oo dhawr sanadle ah.

2.5 Waaxda caafimaadka iyo adeega mushtamaca,waaxada caafimaadka guud iyo caafimaadka xirfadlayaasha iyo golaha talo bixinta iyo adeegyada gargaarka ee caruurta iyo qoyska.

Waaxahan oo dhami waxay taageeraan kana wada shaqeeyaan in dadku helaan daryeel caafimaad kiisa ugu tayada fiican iyo guud ahaan hore u marinta daryeelka caafimaad ee dadka Wales. iyagoo wadar ah ayay masuul ka yihiin maal galinta,samaynta siyaasada daryeelka caafimaad iyo ta caafimaadka guud,baadhitaanka iyo la dagaalanka sinaan la'aanta, dhisida adeegyada mujtamaca, mudakar iyo daryeelka caruurta, iyo bixinta talo iyo caawinba, maal galinta iyo daryeelka dadka jilicda san.

2.5.1 Hawlaha ugu mudan qorshaha fulinta:

- Xoojinta iyo ku qal qaalinta dardar-galinta u sinaanta helitaanka daryeelka caafimaad iyo bulsho ee Wales lana a deegsanaayo hubinta sinaanta,kala duwanaanshaha iyo xuquuqu banii aadamka ayaa ah manbaca takhdiidka istiraatiigiga ah iyo hore u marinta shaqaalaha.

- Kor u qaadida tayada daryeelka caafimaad ee Wales.

- Hagaajinta tayada tacliinta caruurta iyo qosaskooda oo soo gali doona qorshaha qoysaska sadexda sanoadood ee inagu soo foolka leh.

Waaxdani waxay la shaqaysaa hay'adahan soo socda ee baadhitaaneed, waxayna wada leeyihiin qorshe fulineed:

The Care Council for Wales wuxuu la shaqeeyaa golaha talo bixinta iyo adeegyada gargaarka caruurta iyo qoyska. waxaanay soo bandhigaa heer aad u sareeya oo ku aadan dadka ka shaqeeya khadmada mujtamaca . Ku tala gal kooduna waa inay hubiyaan in 150,000 ee caruur iyo cirooleba ee hela daryeelka bulsho is ku hal wakhti gobolka Wales inay ku kalsoonaan karaan helitaanka shaqaale si fiican u toobabaran,cilmi haboon u leh shaqadooda una shaqeeya si nidaamsan.

Hay'ada The Health Inspectorate Wales ayaabaa ka mas'uul ah dib u eegista iyo

baadhitaanka rugaha caafimaad ee ay maal galiyaan hay'ada caafimaad ka ee Welsh ku(NHS). taas oo a abuuraysa kalsooni lagu qabo adeegyadaa iyo caawinta hore u marin aan istaagin xaga tayada iyo amaanada rugaha caafimaad ee hela maalgalinta dawlada.

2.6 Waaxda dhaqanka

Waaxdan u jeedada ay u taagan tahay waa hore u marinta adeegyada si qof waliba u hel fursad uu kaga faa'idaysto kuna raaxaysto qaninimada iyo kala duwanaanta dhaqanka iyo taariikhda ay Wales soo bandhigto. Waaxdani sidoo kale dalxiiska ayay horemarisaa.

2.6.1 Hawlahooda ugu mudan:

- Dhiiri galinta qaybaha mujtama ee kala duwan sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen aabuurista dabeecada casriga ah ee hidaha iyo dhaqanka Wales.

- Fursad siinta qaybaha mujtama oo dhan si ay u helaan fursado ay kaga qayb qaataan halaha dhaqanka iyo hore u marintiisa iyo ilaalintiisaba. dhankaas oo muujinaaya kala duwanaanshaha Wales iyo dhaqanada badan ee lagaga dhaqmo.

2.7 Waaxda arimaha la xidhiidha dadka shaqaalaha ah

Waaxdani waxay shaqaalaha u qabataa adeegyo farabadan oo ay ka mid yihiin tooba-barida,hore u marinta,shaqo qorida gudaha hay'adah dawlada iyo dibadaba,maamulka iyo maaraynta qaabka shaqada loo qabto,hubinta caafimaadka iyo amaanka bii'ada laga shaqaynayo,daryeelka caafimaad goobaha shaqada,mushaharka iyo lacagta hawl-gabka.

2.7.1 Hawlaha mudnaanta hore leh:

- Bedelida hab dhaqankeena si uu u abuurmo isbadal kuli ah,uguna kalsoonaano kala duwanaanshaheena..

- Hubinta in uu jiro hab cad oo la taaban karaayo oo lagu ogaado laguna xisaabiyo

ixtiraamka kala duwanaanshaha.

- Kobcinta nidaamka si uu qof walba ugu saamaxo inuu gaadho hiigsigiisa.

- suuragalinta in shaqaaluhu u kobco ama ka kobco maalin ba maalinta ka danbaysa dhinaca matalaada iyo inay ka dhax muuqdaan mujtamacyada kala gedisan ee Wales ka kooban tahay.

2.8 Waaxda adeegyada guud iyo fulinta

Waaxdani waxay gacan ka gaysataa mashruuca ugu wayn ee dawlad goboleedka Welsh ka ee isbedel doonka, is dhex galitaanka iyo fulinta hore u marinta dhamaan hay'addaha adeegyada guud ee Wales .

Hadafkuna waa in muwaadinka iyo baahidiisu noqoto asaaska lagu jaan goynayo samaynta adeegyada iyo heerka tayo ee uu filanayo natiijooyinka hor hdaca ahina aad bay u sareeyaan isuna bedalayaan si xawli ah.shaqo hufan oo tayo sare lahi waa inay bedashaa habkii soo jireenka ahaa, lana hubinayo kudhaqanka saxda ah ee mabda'a sinaanta iyo cadaalada umada dhexdeeda .doorka waaxdani waa inay hubiso ku dhaqanka hay'adaha ay la macmiisho arimahaa kor ku xusan.

2.8.1 Hawlaha ugu mudan:

- Kadhigida baahida muwaadinka Wales asaaska lagu jaangoynayo samaynta adeegyada.

Waaxdu waxay gacan saar shaqo la leedahay hay'ada baadhitaanka iyo daba-galka ee The Care and Social Services Inspectorate. Qorshe shaqona way ku wada jiraan :

Hay 'adahan oo ka dhax shaqeeya waaxdan Adeegyda, waajibkoodu waa baadhitaanka iyo daba galka maamulka adeegyada mushtamaca iyo laamaha soo raaca eee ku lug leh hawlahaasi. iyagoo ku dhaqmaaya nidaam ka ay u dejiyeen Dawlad goboleedka Welshku.

2.9 Waaxda arrimaha Baaddiyaha

Waaxdan waxaa ka go'an gacan siinta beeralayda si ay u helaan dhaqaale waara, cadaalad iyo wax ka qabashada bii'add. waxay hore u marisaa kana shaqaysaa tayaynta daryeelka caafimaad ee xayawaanka. Waaxdani waxay samaysaa qorshaha hore u marinta reer miyiga ee Wales taas oo gacan siisa wax beerida,ilaalinta kaymaha, cunto soo saarida iyo dib u cusboonaysiinta mujtamaca miyiga.sidoo kale waxay samaysaa talo bixin khusaysa arimo badan oo la xidhiidha nolasha miyiga iyo iyadoo kala wreegta ama waaxadan ay ku soo dhacaan dhamaan siyaasadaha hore marinta miyiga ee ka soo baxa waaxaha kale ee dawlad Goboleedka Welshka.

2.9.1 Hawlaha mudnaanta hore leh:

- Tayo cad oo kaamil ah oon kala go lahayn inaan ku shaqayno si aan u qaabilno baahiyaha kala duwan ee miyiga Wales.

2.10 Waaxda cadaalada mushtamaca iyo dawlada hoose

Waaxdani waxay ka mas'uul ka tahay tayaynta iyo hore u marinta adeegyada guud ee Wales,iyagoo xooga saraya qaybaha bulshada ee jilicda san and delivering excellent public services in Wales, with a particular emphasis on safeguarding and supporting vulnerable people, cdaalada mushtamaca iyo hoos u dhigida sinaan la'aanta. sidoo kale waxay garab siisaa maal galina ku samaysaa qaybaha kale ee dawlada si loo gaadho isla himilooyinkaas.

2.10. Hawlaha mudnaanta hore leh:

- Kor u qaadida cadaalada bulshada iyadoo hoos loo dhigayo dhibaatada faqriga da'yarta Wales.

- Taageerida dadka mushtamaca ugu jilicda san iyadoo la horemarinaayo dhaqaalaha lana hubinaayo in qof waliba ka xoroobo faqriga..

- Abaabulida mujtamac isku xidhan, taasoo dhiiri galinaysa dib u cusboonaysiinta mushtamaca, wadaagana mabaadi iyo fursadaha loo wada siman yahay taas oo saamaysa dhinac walba oo ka mid ah mujtamaca Wales.

- Kor u qaadida iyo xoojinta gaadhsiinta khadmadaha dad yowga taagta daran kuwaas oo ay ku jiraan dhibanayaasha xad-guddubka qoyska dhexdiisa.

3 Hab ama usluub kale oo lagu soo saaro mashruucan

Qoraalkan khulaasada fulintu wuxuu ku soo baxay siyaabo iyo luuqado kala duwankana mid tahay luuqada Braile ee dadka aan indhahooda adeegsan karayn, iyadoo dhagaysi ah , British Sign Language ama luuqada ishaaradaha iyo hab si sahlan loo akhriyi karo.

hadaad danaynaso hab ama usluub k amida kuwaasi fadlan na soo ogaysii.

Waanu soo dhawaynaynaa wixii faalo\talo ah kuna saabsan mashruucayagan SES.. sidaa saad samayn kartaa, ama nasoo waydiiso usluubaha kale kor ku xusan, ama cipy dhan oo mashruuca sinaanta aan kala reebka lahay SES iyo

qrshayaashiisii fulinta adigoo isticmaalaya tafaasiisha hoos ku qoran:

Equality and Human Rights Division

Welsh Assembly Government

Room 3.13

Cathays Park

Cardiff

CF10 3NQ

ehrd@wales.gsi.gov.uk

Fax: 029 2080 1067

Telephone: 029 2082 3772

http://new.wales.gov.uk/topics/equality/?lang=en